

Macluumaadka korona ee Jyväskylä

23.3.2020

Astaamaha cudurka iyo qaadistiisa

Astaamaha cudur ama xanuun ee fayraska korona uu keeno waa xummad ama qandho, qufac iyo neefsashada oo adkaata. Dadka uu xanuunkani ku dhaco badankoodu waxay u xanuunsadaan qaab u dhigma infekshannada neefsashada adkeeya ee caadiga ah ama hargab oo kale. Saamiga fayraska korona waxaa laga qaadaa dadka cudurka haya in la baaro ay khasab tahay oo kaliya.

Haddii aadan isku arkin astaamo xanuun oo sii daran, aayar baad gurigaaga iska joogi kartaa oo ku nasan kartaa. Waxaa muhiim ah, inuusan cudurku ku faafin ama ku dhicin dadka kale ee xanuunku sida daran u soo ridan karo.

Cudurkan wuxuu khatar gaar ah u leeyahay dadka (waayeelka) ah iyo kuwa jirrooyin kale qaba, tusaale ahaan cudurrada sambabbada iyo wadnaha. Habka ugu wanaagsan ee cudurkan looga gaashaaman karo waa iyadoo nadaafadda gacmaha lagu dadaalo.

Cudur qaadista ka dhowr dadka kale – xusuuso nadaafadda gacmaha

Ugu yaraan labaatan ilbiriqsi ku dhaq gacmaha saabbuun iyo biyo. Warqad nadiif ah ku qallaji gacmaha.

Ha taataaban ama ha marmarin indhaha, sanko ama afka, haddii aadan islamarkaas gacmaha soo dhaqanin. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa maaddada jeermisdilidda.

Markaad qufacaysid ama hindhisaysid, safaleeti ama warqad loogu talaggalay wejigaaga ku dabool oo safaleetigaasna qashinka ku rid. Haddii aadan safaleeti ama warqad kale haysanin, ku qufac laabatada gacanta shaarka, calaacasha ha ku quficin.

Haddii astaamaha xanuunkaagu ay fududyihiin – guriga ku naso oo cid kale ha qaadsiin

Dadka uu cudurkani ku dhaco badankoodu qaab fudud buu ugu dhacaa oo toddobaad ay gurigooda ku nastaan bay uga bogsoodaan, iyagoo aan dhakhtar la kulmin. Haddii aad isku aragtid calaamado hargab oo caadi ah, tusaale ahaan qufac ama qandho, gurigaaga ku naso. Daawooyinka xanuun bi'iyayaasha ayaad iskaga fududayn kartaa.

Haddii astaamaha xanuunkaagu ay adagiyihiin – ugu horrayntii mar walba telefoon soo dir

Haddii xaaladdaadu aad u darantahay oo neefsashadu kugu adkaato, soo wac nambarka fayraska korona 014 266 0133. Telefoonkaas waxaa laga jawaabayaa isniin ilaa jimce, saacadaha u dhexeeya 8–16.

Wakhtiyada kale soo wac daryeelka caafimaad ee degaanka telefoonkiisa heeganka talasiinta oo ah 116 117.

Telefoonka waxaa lagugu siinayaa tilmaanbixin ku aaddan waxa lagaa rabo inaad samaysid, wakhtiga iyo goobta aad imaan kartid.

Haddii xaalad degdeg ahi jirto, soo wac 112.

Anigoo xanuunsan baan guriga joogaa oo dukaan iyo farmashiye ma aadi karo – maxaan samaynayaa?

Haddii aad xanuunsantahay oo aadan dukaan iyo farmashiyeba aadi karin, ehelka ama deriska caawimaad weyddiiso. Dukaamada raashinka iyo farmashiyeyaashuba waxay leeyihiin adeegyo guryaha wax la isugu keeno. Haddii aad wax ku caawiya waysid, caawimaad ka codso magaalada Jyväskylä.

Dadka Jyväskylä ku dhaqan: maalmaha shaqada, saacadaha 8–18, nambarka 014 266 0550.

Dadka Hankasalmi ku dhaqan: maalmaha shaqada, saacadaha 8–16, nambarka 014 267 1490.

Wakhtiyada kale reer Jyväskylä iyo Hankasalmi waxay sidoo kale caawimaad ka helayaan heeganka arrimaha bulshada, t. 014 266 0149.

Sidee buu fayraska korona u saamaynayaa nolosha dadka Jyväskylä ku dhaqan?

- Dibadaha ha u safrin. Haddii aad waddan Finland dibaddiisa ah ka timaaddid, guriga joog 14 maalmood iyo habeen.
- Adigoo xanuunsan ha aadin shaqo, dukaan iyo meelo kaleba, tusaale ahaan meel ay dad kale joogaan.
- Ilmahaaga oo xanuunsan ha geyn xannaanada carruurta oo ayeeydiis iyo awoowgiisna ha u geynin.
- Kulan 10 qof ka badan ma habboona.
- Iska joog-joogitaanka aan loo baahnayn ee goobaha guud waa in la iska dhowro.
- Inta 70-jirka ka weyn waxaa u wanaagsan, inay guryahooda joogaan. Bannaanka waa lagu soo lugabbaxsan karaa.
- Guryaha ay ku noolyihiin waayeelka iyo naafada (tusaale ahaan guryaha waayeelka lagu xannaaneeyo) lama soo booqan karo.
- Isbitaalka waxaa aadi kara qof xanuunsan oo kaliya. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, qaybta dhalitaanka ama ummulidda waxaa laga oggolyahay qof caafimaad qaba oo goobta soo gaarsiya iyo lammaane ama qof kale oo caawiye u ah, inuu dhalmada ku weheliyo.
- Iskuullada iyo goobaha waxbarasho way xirnaanayaan ilaa 13.4. Faahfaahin dheeraad ah: <https://www.jyvaskyla.fi/opetus/perusopetus-jyvaskylassa/jyvaskylan-koulujen-varautuminen-koronavirukseen> ja [Gradia keskeyttää lähiopetuksen](#)
- Goobaha jimicsiga iyo dhaqanku way xiranyihiin laga bilaabo 17.3.
- Daryeelka ilkaha lama aadi karo, haddii la hargabsanyahay. Xaaladaha degdegga ah (tusaale ahaan ilig-xanuun daran), bukaanka hargabsan waxaa telefoonka lagu siinayaa tilmaanbixin ku aaddan, sidii uu barta qaabbilaadda u imaan lahaa.

Maxaan samayn karaa, intaan karantiinka ama goonni ku haynta ku jiro?

Weyddiiso shaqaalaha daryeelka caafimaadka warbixin ku saabsan karantiinka (oo luqaddaada ku qoran). Waa muhiim, inaad tilmaanbixinta raacdid. Faahfaahin dheeraad ah oo karantiinka ku saabsan: <https://www.jyvaskyla.fi/terveys/korona/karanteeni>

Macluumaadkan waxaa lagu diyaariyay tilmaanbixintii jirtay 19.3.2020. La soco wararka arrinka.

Faahfaahin dheeraad ah:

Magaalada Jyväskylä boggeeda korona: <https://www.jyvaskyla.fi/terveys/korona>

Updated information on Coronavirus in Jyväskylä in English:

https://www.jyvaskyla.fi/en/news/2020-03-13_updated-information-coronavirus

Macluumaadka cusub ee Finnish Institute of Health and Welfare (Terveyden ja hyvinvoinnin laitos THL) oo ingiriis ah:

<https://thl.fi/en/web/infectious-diseases/what-s-new/coronavirus-covid-19-latest-updates>

Macluumaad ku saabsan go'aanka dowladda Finland oo la xiriiira fayraska korona oo af ingiriis ah:

<https://valtioneuvosto.fi/en/information-on-coronavirus>